



Humanitarian Settlement Program

Barnaamijka Dejinta Aadamiga

Barnaamijka Dejinta Aadamiga (Humanitarian Settlement Program - HSP) wuxuu siiyaa kaalmo dadka ku soo gala habka aadamiga si loo dhiso xirfadaha iyo aqoon ay ku noqdaan kuwa isku-filan isla markaana ah xubina firfircoon oo bulshada Australia ka tirsan.

Ka qaybgelida HSP maaha khasab adeegyadana waxa bixiya macaamiil iyaga oo ku bixiya hanaanka maaraynta kayska ee ku salaysan baahida.

Bixiyayaasha adeega HSP waxay kaalmeeyaan macaamiisha si ay u yeeshaan natiijooyinka meelaha soo socda kuwass oo asal u ah deganaansho guul leh.

- Shaqada
- Samaqabka jireed iyo kan maskaxeed
- Waxbarashada iyo tababarka
- Wada xiriirka iyo ka qaybgalka bulshada
- Gurisiinta
- Kaalmada bulshada iyo shaqaynta qoyska
- Maaraynta lacagta
- Cadaalada
- Adeegyada Luqada

HSP waxaa loogu talagalay inay la shaqayso adeegyada kale ee guud. Waxay si xoogan diirada u saartaa ka caawinta macmiiluhu inuu barto Ingiriiska oo uu yeesho waxbarashada lagama maarmaanka u ah xirfadaha shaqada iyada oo la aamisan yahay in natiijooyinka wax ku oolka ah oo dhinacyadaasi ka caawimi karaan soogalootiga habka aadamiga ku yimid inay la qabsadaan nolosha Australia.

Adeegyada lagu bixiyey HSP

Maamulayaasha kaysaska HSP waxay la shaqeeyaan macaamiisha si horay loogu mariyo qorshaha maaraynta shakhsiga loogu talagalay in la siiyo adeegyo wada socda oo lagu jaangooyey baahidooda la carabaabay.

Adeegyada waxaa ka mid ah kaalmo la taaban karo sida:

- ku soo dhowaynta gegida diyaaradaha
- meesha la degayo marka yimaado iyo barida waxa guriga yaal
- keendia cuntada ugu horraysa iyo waxyaallaha muhiimka ah
- ka caawinta iska diiwaangelinta Santrarlinki (Centrelink), Midikayr (Medicare) iyo bangi.
- wax ka qabashada baahida caafimaad ee degdegta ah
- awaamiirta wixii la samaynayo xaalladaha degdegta ah iyo sida lagu helo adeegyada afcelinta
- war ka siinta adeegyada agagaaraha.



Humanitarian Settlement Program

Adeegyada kale oo la helli karo si loo caawimo in macaamiishu hellaan waxay degitaanka uga baahan yihiin kuwaas oo ay ka mid yihiin:

- barnaamijka ka warbixinta wadanka taas oo dhisaysa aqoonta macmiilaha wixii ku saabsan habka nololeed iyo qayimka
- ka caawinta meesha laga hellayo guri muddo dheer ah
- ka caawinta helida adeegyada muhiimka ah, sida caafimaadka iyo adeegyada kaalmada qoyska
- ku xirida kooxaha bulshada ee agagaaraha iyo waxay qabtaan
- ka caawinta inay iska qoraan Barnaamijka Ingiriiska ee (Adult Migrant English Program - AMEP) iyo tegida xiisadaha
- in laga caawimo iska qorida waxbarashada iyo tababarada iyo aqoonsiga xirfadaha iyo shahaadoyinka ay la yimaadeen
- Ka caawinta la xiriirka adeegyada shaqada, hirgelinta istaraatiijiyada shaqada iyo helida adeegyada kaalmada si loo asaaso ganacsi.

Adeegbixiyayaasha HSP waxay sahlaan xeraynta dalabyada Adeega lacag la'aanta ah ee tarjumida (Free Translating Service - FTS) wixii xaq u leh macaamiisha FTS ee aan awood u lahayn oline-ku xeraynta.

ka bixida HSP ku waxay salaysan tahay macaamiisha oo hella maxsuulada degitaanka lagu xusay qorshahooda maaraynta. Macaamiisha badankood, natiijooyinkaasi waxay gaari karaan lix ilaa sideed iyo toban bilood markaad Australia timid.

Adeegyada Takhasuska ah oo degdega ah

HSP waxay siisaa adeegyo takhasus ah iyo adeegyo degdeg ah (Specialised and Intensive Services - SIS) kuwa ku yimid habka aadamiga iyo kuwa kale ee qaba baahi qalafsan.

SIS waxay siisaa kaalmo mudo gaaban ah (badanaa lix-bilood) si loo caawimo inay hellaan ku haboon ayna horumariyaan xirfadaha lagama maarmaanka ah si loo maareeyo baahidooda si madaxbanaan.

Wasaarada Adeegyada Bulshada (Department of Social Services - DSS) waxaa waajib ku ah inay ansixiyaan xawilida qofka si uu u hello SIS. Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan sida loo xawilo, arag – sida loogu xawilo qof SIS.

Helida HSP

Marka qof la siiyo fiisoyinka soo socda midood si uu u dego Australia, waxaa adeega HSP u soo xawisha DSS si qofkaasi u hello kaalmada marta HSP markay yimaadaan Australia.

- Qaxootiga (Refugee) (subclass 200, 201, 203, iyo 204) fiisada; iyo
- Barnaamijka Khaaska ah oo Caalamiga ah ee Aadamiga (Global Special Humanitarian) (subclass 202) fiisada*

*Shakhsiyaadka la siiyey fiisada subclass 202 oo hoos imanaya Barnaamijka Kaalmada bulshada (Community Support Program - CSP) ma ay mudna inay hellaan kaalmada hoos imanaysa HSP imaanshahooda Australia markay ka helaan adeegyada degida Hay'ada La Ansixiyey ee Soo jeedinaysa (Approved Proposing Organisation). Macluumaadka CSP waxaa laga helli karaa websaytka Wasaarada Arrimaha Gudaha oo ah (Department of Home Affairs') oo ah www.homeaffairs.gov.au. Iyada oo ku xiran ansixinta DSS, soo-galayaasha CSP ayaa laga yaabaa inay xaq u leeyihiin inay hellaan SIS.



Humanitarian Settlement Program

Xaq u yeelashada SIS

Iyada oo ku xiran ansixinta DSS, dadka haysta mid ka mid ah fiisooyinka soo socda waxaa laga yaabaa inay hellaan SIS oo hoos timaada HSP:

- Qaxootiga (Refugee) (subclass 200, 201, 203, iyo 204) fiisada; iyo
- Barnaamijka Khaaska ah oo Caalamiga ah ee Aadamiga (Global Special Humanitarian) (subclass 202) fiisada
- Fiisada Xafidaada (Protection) (subclass 866); iyo
- Xafidid ku-meelgaar ah (Temporary Protection) (subclass 785), Joogis Adaminimo oo ku-meel gaar ah (Temporary Humanitarian Stay) (subclass 449), Dareen Adaminimo oo ku-meel gaar ah (Temporary Humanitarian Concern) (subclass 786) Safe Haven Enterprise (subclass 790).

Kuwa haysta fiisooyinkan waxaa laga yaabaa inay mudan yihiin SIS ilaa shan sanadood ka dib imaanshahooda Australia ama ilaa shan sanadood ka dib markay hellaan mudnaantooda fiisada gudaha. Xaallada khaasa, debecsanaan ayaa laga yaabaa in laga muujiyo waqtigaan iyo kuwa kale ee haysta fiisa hoosaadyada kale ee SIS.

Dadka mudan SIS waxaa waajib ku ah inay muujiyaan awood la'aanta inay si madaxbanaan u hawlgeliyaan kaalmooyinka ku haboon iyo inay saameeyaan caqabado badan ama qalafsan oo ay ku jiri karaan:

- iinta
- baahiyaha caafimaad kuwaas oo aad u daran, khatara, mudo dheer qaadanaya iyo/ama aan la maarayn karin
- Arimaha caafimaadka dhimirka
- Guri la'aan ama xasilooni la'aanta gurisiinta
- Rabshada qoyska ama guriga
- Welwelka samafalka dhalinyarada iyo ilmaha
- Qoyska iyo /ama burburka cilaaaqaadka
- Cidlanimada bulshada
- Dhibaataada dhaqaale
- Arrimaha sharciga

Sida loogu xawilo SIS

Urur kasta ama qof kasta ayaa u xawili kara qof SIS, qofka ayaa isaguna isu diri kara. Si loo sameeyo xawilaad, fadlan buuxi SIS Foomka Xawilida (SIS Referral Form) oo laga helo www.dss.gov.au.

Haddii aadan hubin in qof mudan yahay SIS, waxaad awoodaa inaad la xiriirto DSS wixii caawima ah adigoo wacaya 1300 855 669 (lacag la'aan Australia gudaheeda) ama adiga oo email u diraya SIS@dss.gov.au.



Humanitarian Settlement Program

Adeegbixiyayaasha HSP

HSP waxaa lagu bixiyaa magaca Xukuumada Australia waxaana bixiya shan adeeg bixiye oo 11 kunturaadood oo ka jira dhamaan Australia.

HSP Adeeg bixiye	Dawlad Goboleedka	Qaybaha kunturaada	Goobaha Dejinta
Settlement Services International Limited	NSW	Sydney, Gobolka NSW (Regional NSW)	Sydney; Newcastle; Coffs Harbour; Armidale
Australian Red Cross	NSW/ACT	Canberra iyo inta ku wareegsan (and surrounds)	Canberra; Wollongong; Wagga Wagga; Albury
	WA	Western Australia	Perth
AMES Australia	VIC	Melbourne, Qaybaha Fiktooriya (Regional Victoria)	Melbourne; Mildura; Shepparton; Geelong; Wodonga
	SA	Koonfurta Australia (South Australia)	Adelaide; Mount Gambier
	TAS	Tasmaaniya (Tasmania)	Hobart; Launceston
MDA Ltd	QLD	Brisbane iyo inta ku wareegsan (and surrounds); North Queensland	Brisbane; Gold Coast; Logan; Toowoomba; Cairns; Townsville
Melaleuca Refugee Centre	NT	Northern Territory	Darwin

Adeega bixiyaha HSP ee goobaha dukaamada iyo meesha lagala xiriirayo macluumaadka waxaa laga hella www.dss.gov.au.

Macluumaad intaas ka badan

Si aad u ogaato wax intaas ka badan oo ku saabsan HSP, iyo hawlaha kaleeto ee degitaanka ay maamusho DSS, booqo www.dss.gov.au